



Nasiib wanaag, qaaxada qarsoon waxaa lagu daaweyn karaa antibiyootiko ka hor intii aadan ku xanuunsan.

Ka dib markii aad timaado dalka UK waxaad isku diiwaan gelin kartaa takhtarka qoyska ee Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) oo lagu magacaabo Takhtarka Guud ama 'GP'. GP'gaaga ayaa laga yaabo inuu kugu sameeyo baaritaan dhiig si loo hubiyo haddii aad qabto Qaaxada qarsoon. Haddii aad qabto Qaaxada qarsoon waxaa lagu siin doonaa daawayn kugu caawiya dilitaanka jeermiska iyo ilaalinta caafimaadkaaga

mustaqbalka. Baaritaanka iyo daaweynta waa qarsoodi iyo lacag la'aan, iyo ma saamayn doono xaaladdaada fiisada ama xaqa aad u leedahay inaad sii joogtid dalka UK.

**Si ammaan ah ku hayso qoraalkan si uu kuu xusuusiyo inaad iska diiwaangeliyo GP, ama si aad si deg deg ah u aragto takhtar haddii aad yeelato calaamadaha qaaxada.**



Waxaad GP'gaaga kuugu dhow ka heli kartaa [www.thetruthabouttb.org/FindaGP](http://www.thetruthabouttb.org/FindaGP)